

Tallaabooyin cusub oo lagula dagaallamayo faafitaanka COVID-19

Xigasho: dowlada Malta

Laga bilaabo 29^{ka} Maarso 2021:

- Xayiraadaha safarka ee cusub: Dhamaan soogalootiga soo galaya Malta ee ka imanaya dalal kale waxay u baahan doonaan inay soo saaraan **baaritaanka PCR-ga oo taban ee aan ka badnayn 72 saacadood** kahor imaatinka Malta.
- Rakaabka yimaadda tijaabo la'aan waxaa looga baahan doonaa inay ku qaataan **tijaabada PCR Malta dhexdeeda. Qof kasta oo diida inuu qaato tijaabada ama laga helo COVID-19 waxaa lagu xukumayaa karantiil.**

Laga bilaabo 31^{ka} Maarso 2021:

- Kooxo ka badan 2 qof waa mamnuuc, ilaa kooxdu ay ku wada nool yihiin hal guri. Dadku waa inaysan **isugu imaan kooxo ka badan laba qof meelaha caamka ah**, oo ay ku jiraan safafka iyo meelaha basku istaago, ilaa la ilaaliyo kala fogaanta bulshada ee 2 mitir ah.
- Ganaaxa kuwa jebiya sharciga ayaa kor loogu qaadayaa **€ 300** halkii hadda ey ka ahayd € 100.

Tallaabooyinkan ayaa baaqi sii ahaan doona illaa 11^{ka} Abriil 2021.

XASUUSIN

Xirashada maaskaro waa qasab gudaha iyo banaanka meelaha caamka ah. Qof kasta oo lagu helo inuusan xirneyn maaskaro wuxuu bixin doonaa ganaax lacageed oo gaaraya **€ 100.**